



Hadafka jardiinooyinka Seattle iyo goobaha lugu nasto

Seattle Parks and Recreation waxay bixisaa goobo soo dhaweyn iyo amaan ah oo lagu ciyaaro, wax lagu barto, lagu nasto, laguna dhiso bulshada, waxayna kobcisaa mas'uuliyadda dhulka. Waxaan dhiirrigelinnaa caafimaadka dadka, caafimaadka deegaanka, iyo bulshooyin xoog leh.

Seattle Parks and Recreation waxay ku faraxsan tahay inay ku dhawaaqdo deeqda Soo-dhaweynta Seattle. Xubnaha bulshada iyo ururada waxay ku heli karaan ilaa \$10,000 deeq yar yar iyo kuwa fudud ee lagu maalgalinayo barnaamijyada Jardiinooyinka Seattle iyo Goobaha cagaaran ee lagu madadaaleysto.

Haddii aad rabto inaad dalbato deeqdan, fadlan ka akhriso tilmaamaha hoos ku qoran. Arjiga deeqda waxaa laga helayaa seattlepark.gosmart.org ka dalbo on-lineka.

Ujeedo: Deeqdan waxaa loogu talagalay inay bixiso fursado lagu helo, iyo ilaha loogu talagalay bulshadaas kuwa ugu fog adeegyada, waxbarasho, dhaqaale, caafimaad iyo sinnaan bulshada waana inay taageertaa ka bogsashada saddexda masiibo ee sinnaan la'aanta/kala-takoorka jinsiga, Kala-go'naanta bulshada ee wadajirka ah, iyo hoos u dhaca dhaqaalaha.

Waxaan maalgelinnaa barnaamijyo dhaqan ahaan kusaleysan oo diiradda lagu saaray jirdhiska, fayooabaanta maskaxda, dhismaha hantida, iyo bogsashada bulshada iyadoo xoogga la saarayo beelaha jinsiyada madow iyo dadka asaliga ku ah magaaladan. Hawlaha maalgalintu waxay xoojinayaan iskaashiga ka dhexeeya Jardiinooyinka Seattle ahna Goobaha Madadaalada iyo Bulshooyinka Seattle.

Kulamada macluumaadka bulshada si wax looga barto deeqdan iyo sida loo codsado

Kulanka Qadka kumbuyuutarka: Wixii kusaabsan xiriirka kumbuyuutarka iyo faahfaahin dheeraad ah nagala soo xiriir PKS_SPRFunds4All@seattle.gov

Khamiista, Abriil 15keeda 6:30 – 8:00 xilli Habeen & Talaado, Abriil 20th 6:30 – 8:00 gelinka dambe

Kulan toos ah ee Waji ka waji ah Waa inaad isdiiwaangalisaa mudo 1 saac ah - fadlan nala soo xiriir emailkan PKS_SPRFunds4All@seattle.gov fadlan dooro maalinta aad jeceshahay inaad la kulanto

Saturday, April 10 th	1-5:00pm	Rainier Beach Community Center
Saturday, April 17 th	1-5:00pm	Garfield Teen Life Center
Saturday, May 1 st	1-5:00pm	Waxaa jiri doona kulan lugu qabanyo xaafada Lake City (nala soo xiriir si aad macluumaad u hesho)

Waqtiga jadwalka dalabka:

Codsiyada deeqaha waxaa laga heli karaa boggayaga internetka seattlepark.gosmart.org: Taariikhdu markey tahay April 9th, 2021

Codsiyada waxaa la xirayaa: May 7th

Guddigu wuxuu dib u eegi doonaa codsadyaasha: May 12- 21st

Codsadyaasha arjigoodu guuleystey warqad baa loo dira yaa May 25 & 26th

Dhammaan barnaamijyada la maalgeliyey waa inay dhacaan inta u dhexeysa Juun 26th ilaa Diseembar 12th 2021

Ka digtoonaanshaha khatarta Covid:

Dhammaan barnaamijyada waa inay raacaan shuruudaha amniga iyo caafimaadka si waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka, iyo u hogaansanaanta COVID-19 dhaqamada badbaadada gaarka ah ee shaqada, sida lagu qeexay Baaqii 20-25 ee Gudoomiyaha Gobolka Jay Inslee, ee ah "joog Guriga, kuwo Caafimaad Qaba noqda" Waaxda Shaqada Caafimaadka ee Gobolka Washington iyo Kheyraadka Loo shaqeeyaha & Taloyin ku saabsan <https://www.doh.wa.gov/Coronavirus/workplace>.

Mashruucyadu waa in:

- Lugu qabtaa Magaalada Seattle jardiinadeeda ama gudaheeda, ama meelaha banaanka ah ama waxaa lagu qaban doonaa qadka fiidiyoowga oo meel bulshada dhexdeeda ah.
- Mashruucu waa inuu bixiyaa fasalo, waxqabadyo mashruucyo, ama howlaha barnaamijka loo qabanqaabiyo bulshada dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa la dayacey.

U qalmida - yaa dalban kara::

- Shaqsiyaadka
- Kooxaha bulshada ee deegaanka
- Ganacsiyada yaryar ee ka shaqeeya gudaha xaafadaha la caleemo saarey*
- Hay'adaha samafalka ah iyo ururada aan macaash doonka ahayn*

**Ganacsiyada iyo ururada samafalka waa inay lahaadaan miisaaniyad kayar \$ 150,000 dakhli. Dhammaan ganacsiyada iyo ururada aan macaash doonka ahayn waxaa looga baahan yahay inay soo diraan nuqul ka mid ah miisaaniyadooda ee sanadka socda.*

Kooxaha codsanaya looma baahna inay noqdaan 501 (C) (3) aan macaash doon ahayn loomana baahna inay isticmaalaan kafaala-qaade maaliyadeed. Haddii lagu maalgeliyo, waxaa lagaa doonayaa inaad hesho Liisanka Ganacsiga Magaalada Seattle iyo caymiska mas'uuliyadda kugu habboon. Kharashka Shatiga Ganacsiga iyo caymiska ayaa lagu dari karaa miisaaniyadda arjiga.

Yaan u qalmin: Hay'adaha Dowladda, Jaamacadaha, Kooxaha Siyaasadda iyo ururada ama ganacsiyada yaryar ee dakhligoodu kor u dhaafay \$ 150,000.

Macluumaadka Arjiga looga baahan yahay:

- Waa inaad noo sheegtaa magacaaga ama hay'addaada ama ururkaaga, kooxdaada ama shaqsiyaadka tahay
- Waa inaad noo sheegtaa qofka lala xiriiirayo ee hay'addaada ama mas'uulka ah.
- Telefoon/emayl
- Waa inaad bixisaa lambarka liisanka hay'adaada, nuqulka W-9 iyo dukumiintiyada caymiska (haddii aad haysato)

Ujeeddada mashruuca iyo natiijada ka soo baxda:

- **Ujeedooyinka Mashruuca:** Si cad u sharax ujeedooyinka barnaamijkaaga iyo sida uu ku gaaro ujeedooyinka ururkaaga, ujeedooyinka Jardiinooyinka iyo Madadaalada, iyo sidoo kale sida aad u fuliso shuruudaha lagu dejiyay deeqdan.
- **Mashruuca Tayada ugu sareeya:** waxaan u baahanahay mashruuc cad, oo sifiican looga fikiray oo kobciya madadaalada, dhaqanka, bulshada iyo/ama kaqeybgalka firfircoonida jirka, xiriirka bulshada oo xoogan, waana mid dhab u ah bulshada.

- **Saamaynta la filayo ee bulshada, Wacyigelinta si looga wada qayb qaat iyo natiijooyinka mashruuca hirgelinta ka dib:** Qorshaha mashruuca wuxuu qeexayaa dadaallada macnaha leh ee lagu kordhinayo kaqeybgalka bulshada ee gaari doona kooxaha kaladuwan iyo kuwa ay adagtahay in la gaaro iyadoo loo marayo wacyigelin lala beegsanayo laguna tilmaamayo istiraatiijiyado wacyigalin ah. Mashruucu waa inuu muujiyaa saamayn waxtar leh oo lagu qiyaasi karo bulshada uu u adeegayo. Bulsho nooc ee ayaad u adeegaysaa? Imisa dhalinyaro/qoys/dadka waaweyn oo aad gaari doontaa? Maxayse tahay natiijada la doonayo ee bulshada loo adeegay? (yacni caafimaadka kafiican miyaa? dhaqdhaqaaqa jirka oo badan miyaa?)
- **Suurtagalnimada:** Ururka/kooxda bulshada/ganacsigu waxay leeyihiin rikoodh la xaqiijiyay oo ah maaraynta barnaamijiyada, waxqabadyada iyo/ama munaasabado kale iyo/ama la muujiyey awooda si wanaagsan u soo saaro barnaamijka ama dhacdada; waa iney caddeysaa ku lug lahaanshaha bulshada iyo taageerada bulshada ay doonayaan inay u adeegaan.
- **Miisaaniyadda mashruuca:** Waxaad codsan kartaa ilaa \$10,000. Miisaaniyad toosan, macquul ah waa in lagu daraa mashruuca ama waxqabadyada, oo ay ku jiraan dhammaan kharashaadka iman kara, tabarucadka aan lacag ahayn, iyo iskaashi kasta oo bixiya lacag dheeri ah. *Mudnaanta waxaa la siin doonaa codsiyada muujinaya baahida dhaqaale ee cad ee lagu shaqeynayo mashruuca la soo jeediyay..*
- **Joogtayn:** Mashruucyada leh qorshe lagu joogteeyo barnaamij sidan oo kale ah marka wareegga maalgalintani dhammaado, ayaa lagu qiimeyn doonaa mid ka sarreeya kuwa aan lahayn qorshe joogtayn ah sida horumarinta iskaashiga, tabarucadka nooca ah, shahaadooyinka jirdhiska iyo iskaashiga saamaynta wadajirka ah..

Xaddidaadda Maalgelinta

- **Waxyaabaha uqalma maalgelinta:** khidmadaha macallimiinta, xayeysiinta iyo khidmadaha xayeysiinta, maareynta mashruuca iyo iskudubaridka/kharashka maamulka, sahayda qalabka, kirada qalabka jimicsiga iyo kharashyada kale ee la xiriira wax soo saarka oo ay ku jiraan caadeynta jirdhiska, iwm. Wax ka badan 10% miisaaniyadda looma isticmaali karo kharashaadka la xiriira cuntada inta ay socoto/barnaamijka.
- **Miisaaniyadda looma isticmaali karo:** kharashyada maamulka, safarka ama kharashyada safarka la xiriira, ee ku baxa howlaha lacag ururinta, ama hadiyadaha. Sidoo kale waxaa ka mid ah kirada, bixinta mileageka masaafada, faa'iidooyinka shaqaalaha, iwm..

U Qalmida Shuruudaha Mashruuca

- Mashruucu waa inuu ahaadaa mid bilaash ah oo u furan dadka oo dhan
- Mashruuca waa in lagu fuliyaa magaalada seattle
- Mashruucu waa inuu u adeegaa dadka gaarka ah oo ku nool xaafad la aqoonsan yahay
- Mashruucu waa inuu lahaadaa wada-hawlgalayaal bulshada ka mid ah oo mashruuca ku lug leh
- Mashruucu waa inuu ka dhacaa Magaalada Seattle inta u dhexeysa Juun 26th iyo December 12, 2021
- Mashruucu waa inuu u hogaansamo bayaanka hadafka Seattle Park iyo Recreation
- Mashruuca Ma lahan karo wax deyn ah ama deeqo la lahaankaraa Seattle Parks & Recreation's Business Service Center (BSC)
- Mashruucu waa inuu lahaadaa dhammaan dukumiintiyada deeqaha iyo maalgelinta la soo gudbiyaa loona arkaa inay dhammaystiran yihiin

Dadweynaha Maalgelinta Mudnaanta leh::

Mashruucyada tilmaamaya kooxaha mudnaanta soo socda ayaa heli doona tixgelin sare:

- *Dadka midabbada leh/madow, dadka asaliga ah, iyo kooxaha kale ee aan adeegyada loo helin*
- *Muhaajiriinta iyo dadka qaxootiga ah*

- *Dhallinyarada/Dhallinyarada (oo ay ku jiraan kuwa yaryar)*
- *Dadka waaweyn (19-50 sano)*
- *Dadka waaweyn ee waayeelada ah 50+*
- *Dadka naafada ah*
- *Dad isku abtirsada oo midba midka kale la xiriira, oo ku lug leh, ama saamaynaya dhowr isla leh ama isla nool.*
- *Qowmiyadda khaniisiinta ah, iskujinsi, jinsi labeeb ah iyo kuwo lahalmaala*

Jardiinooyinka Mudnaanta leh iyo meelaha bannaanka ah ee ku yaal Woqooyi Bari, Waqooyi Galbeed, Koonfur Bari, bartamaha iyo Koonfur Galbeed ee xaafadaha Seattle:

Judkins	Little Brook	Seward	Roxhill
Rainier	Pratt	Lakewood	Westcrest
Bitterlake	Colman	Powell Barnet	Oxbow
Licton Springs	Garfield	Be'er Sheva	Jefferson
Burke Gilman	Rainier Vista	Georgetown	Lake City
Virgil Flame	Maplewood	Delridge	Walt Huntley
Hubbard Homestead	Van Asselt	South Park	

****Haddii mashruucaagu uusan ku jirin mid ka mid ah aagagga la soo sheegay fadlan, nala wadaag sida aad ku gaari doontid bulshooyinka mudnaanta u leh meelaha kale ee aad waxkuqaban rabto.**

Qiimeeynta Codsiga iyo Ogeysiinta

Guddi madax-bannaan oo ka tirsan xubnaha ururrada aan macaash doonka ahayn, bulshada, iyo wakiilada Seattle Parks iyo Recreation ayaa dib-u-eegi doona oo qiimeyn doona codsiyada iyadoo la raacayo shuruudaha barnaamijka waxayna soo jeedinayaa kuwa la maalgeliyo iyo kuwo kale. Ogeysiinta maalgelinta waxaa la sameyn doonaa Abriil 2021.

Su'aalo? [PKS SPRFunds4All@seattle.gov](mailto:PKS_SPRFunds4All@seattle.gov)

Maareeyaha

Lakema Bell

Lakema.bell@seattle.gov

206-684-7006

Taageeraha

Laura Wilburn

laura.wilburn@seattle.gov

206-946-5697

Taageeraha

Giovannina Souers

giovannina.souers@seattle.gov

206-637-4561